

# Xaaladaha guud iyo Gurmada Socda

CADADKA 4

04 NOVEMBER 2019



WASAARADDA GARGAARKA  
& MAAREEYNTA MASIIBOYINKA  
DOWLADDA FEDERAALKA  
SOOMAALIYA

## QODOBADA UGU MU- HIIMSAN

- Dulmar guud ee xaaladda 1
- Gurmada Socda 2

## Dulmar Guud

- ◆ Magaalada Baladweyne, waxaa si tartiib tartiib ah u soo noqonaya isu socodka xaafadaha ay ka kooban tahay Magaalada.
- ◆ Waxaa culeys xooggan uu ka soo kordhay dhinaca nadaafadaha maadaama ay daadadka soo saareen musqulaha.
- ◆ Waxaa si xowli ah ku socda gurmada iyadoo manta ay magaalada gaareen laba diyaaradood oo siday dawo iyo agabyo nafaqo u badan.
- ◆ Midowga dhaqaatiirta Soomaaliyeed ayaa dhinaca kale koox dhaqarro ah u diray magaalada si ay u xoojiyaan adeegyada caafimaad ee loo baahanyahay.
- ◆ Mahaddaay, Webiga ayaa ku bu taacay dhul beereed iyo deegaan. baahida ugu badan waa cunto iyo hooy. Waxaa xaalad taas la mid ah ay ka jirtaa Degmada Jalalqsi. Wabiga ayaa sara u kacay ilaa 60 cm, taasi waxey keentay in magaaladii kala go'antahay. Inta la ogayhay 295 oo qoys ayaa ka barakacy tuulooyinka webiga xiga ee degmada jalalqsi iyagoo tiigsaday bartamaha magaalada.
- ◆ Saadaasha hawada Soomaaliya waxey tilmaameysaa in roobab xooggan ka da'ayaan saacadaha soo socda degaannada Puntland iyo Somaliland.
- ◆ Saadaashu waxey sheegeysaan in roobabkaasi ay suurta gal tahay in ay sidoo kale ku soo durgaan dhinaca degaannada Gal-Mudug.
- ◆ Sida ay saadaashu tilmaameyso, waxaa dhici karta in roobabkaasi ayaa meelaha qaar sababeen daadad ka soo rogmada dhulalka sarsare.



# Gurmadka Socda

- ◆ Dowladda Qadar ayaa deeq gaareysa 42 tan oo isugu jirta agab caafimaad, teendhooyin, mara-kaneeco iyo joodariyaal waxaa manta ay soo gaarsiisay Magaalada Muqdisho. Madaxa Sanduuqa Qadar ayaa deeqdan ku wareejiyay deeqdan Guddiga Gurmadka Qaran ee Fatahaadaha. Gargaarkan ka yimid Qatar ayaa maalinta barrita ah loo daabuli doonaa goobaha ay saameeyeen fatahaada



Dowladda Soomaaliya ayaa dadaal xooggan ku bixisay sidii loo ballaarin lahaa fursadaha loogu gurman karo dadka ay fatahaadaha iyo daadadka ku saameeyeen degmooyinka iyo Goballada Dalka

- ◆ Dowladda Jabuuti ayaa sidoo kale manta soo dejisay gargaar ka kooban dawo, caano iyo agabyada nadaafadda.



- ◆ Ganacsatada ayaa sii wadda qeybinta raashin iyadoo ay mantanna kaarar u qeybiyay qoysas gaaraya 3500 qoo qoys oo la siin doono raashin maalinta baritto ah.
- ◆ Dowladda Soomaaliya ayaa laba diyaaradood oo aaladaha gargaarka degdegga ah waxa ay gaarsiisay magaalada Baladweyne.
- ◆ Howlaha gargaarka ayaa sii socon doona iyadoo markanna saacadaha soo socdana ay dowladdu gargaar u diri doonto Magaalooyinka kale ee dalka sida Bardale iyo Baardheer.